## Bayaanka Saamaynta Sinnaanta ee

## Soo jeedinta Miisaaniyad sanadeedka 2024-25

**Cinwaanka**: Horumarinta Miisaaniyadda FY25 **Taariikhda:** Feebarwari 7, 2024

Aalada Qorshaynta Sinaanta Isirka ma la isticmaalay? ☑ Haa ❑ Maya
Hadday haa tahay, geli taariikhda(yada) shirarka REPT oo isku xidhka REPT ee dhammaystiran halkan: Waxbarashada Qeybta ka ah _Maalgalinta Dugsiga Reimagine
Xubin ka tirsan Qaybta Sinnaanta, Istaraatiijiyada iyo Nusqaamaha Fursadaha miyuu dib u eegay bayaankan? ☑ Haa ❑ Maya

| Qaybaha Habka Qorshaynta Sinnaanta Midabka Jinsiga ee BPS | Si Kooban/Sababta |
|---|---|
| 1. **Soo jeedinta & Saamaynta**<br>*Maxay yihiin dadaalka natiijooyinka la rabo, oo ay ku jiraan baabi'inta farqiga? Yaa hogaaminaya shaqadan/qorshahan, oo miyay ka turjumayaan kooxda aqoonsiyada qoysaska iyo ardayda BPS (kooxaha muhiimka ah waxa ku jira kuwa Madawga ah, Laatina/o/x, Eeshiyaan, Dhaladka, soo galootiga, kuwa luuqadaha badan ku hadla, iyo kuwa leh khibrada Adeegyada Gaarka ah)?* | Miisaaniyadda FY25 waxay rabta inay dhisto aasaaska si loo beddelo natiijooyinka ardayda Boston Public Schools.<br><br>Si aan u gaadhno yoolalkayaga mustaqbalka fog ee dugsiyada tayada sare leh ee u diyaariya ardayda kulliyadda, shaqada, iyo nolosha, dhammaan daneeyayaasha DDB waxay u baahan yihiin inay si xeeladaysan uga fikiraan sida ugu wanaagsan ee loo taageero dugsiyadeenna FY25, laakiin waxaa ka sii muhiimsan, saddexda ilaa shanta sano ee soo socota. . Si loo gaadho isbeddelka lagama maarmaanka ah oo loo beddelo habka aan hadda u shaqeyno, waa inaan dib u fikirnaa maalgelinta dugsiga iyo kalaguurka Maalgelinta Ardayga; in la sameeyo maalgashi taariikhi ah si loo hubiyo in dhammaan dugsiyada DDB ay si hufan u hirgeliyaan waxbarasho loo dhan yahay; iyo badalista raadka jidheed ee degmada si ay si wanaagsan ugu suurtagasho Waaya-aragnimada Ardayga Tayada Sare.<br><br>Miisaaniyada sanadkan waxa ay ku jirtaa dadaal balaadhan oo lagu doonayo in dib loogu habeeyo maalgalinta dugsiga Reimagine iyada oo dib u habayn lagu samaynayo siyaasada maalgelinta degmada si ay si cadaalad ah u taageerto ilma kasta si uu u gaadho hadafkiisa oo uu u horumaro, iyada oo diirada la saarayo ardayda iyo qoysaska taariikh ahaan la takooray. Maalgelinta dugsigu waa hal dhinaca sinnaanta kheyraadka taas oo saamaysa khibradda iyo natiijooyinka ardayga. Waxaan hiigsaneynaa inaan dhisno qaab dhismeed cusub si aan u kala hormarino maalgelinta ardayda iyo dugsiyada leh baahiyaha ugu sarreeya, oo ay ku jiraan ardayda Madawga iyo Laatiinaha/o/x, ardayda naafada ah (SWDs), ardayda luqadaha badan (MLs), iyo ardayda dhaqaale ahaan liidata.<br><br>Waaxda Maaliyadda ayaa hogaaminaysa samaynta miisaaniyada. Kooxaha inta badan ku lug leh waa Miisaaniyadda, Qorshaynta iyo Falanqaynta, Deeqaha iyo kooxaha ESSER. Kooxaha iyo hoggaanka ayaa ka kooban 10 shaqaale ah oo loo aqoonsaday inay yihiin Caddaan; 8 kuwaas oo u aqoonsan Madow ama Afrikaan-Maraykan ah; 4 kuwaas oo u aqoonsan Laatina/o/x; 1 oo tilmaamaya inay kasoo jeedaan Waqooyiga Afrika; 1 oo tilmaamaya inuu yahay Eeshiyaan iyo Dhalad Hawaiian; 1 oo tilmaamaya inay yihiin Madaw iyo Laatinax; iyo 1 loo aqoonsaday Madow iyo Caddaan. |
| 2. **La jaanqaadida Qorshaha Istaraatiijiga ah**<br>*Sidee baa qorshaha istaraatiijiga degmadu u waafaqsan yahay codsiga/dadaalka?* | Miisaaniyadda FY25 waxay ku qotontaa Qorshaha Istiraatiijiga ah. In kasta oo xidhiidhyadu ay badan yihiin, waxyaabaha soo socda ayaa si cad u xuddun u ah soo jeedinta miisaaniyadda:<br>1.4 Hirgelinta taageerooyinka gaarka ah ee ardayda luqadda Ingiriisiga iyadoo la fulinayo sharciga LOOK si loo ballaadhiyo barnaamijyada kor u qaada laba-luqad/luqaddo badan oo ay ku jiraan waxbarashada laba-luqaddlaha ah, labada luqad, iyo barnaamijyada hiddaha dhaqanka.<br>1.10 Kobcinta iyo la socoshada horumarka lagu gaadhayo yoolalka cad ee SWDs iyo hirgelinta xeeladaha lagu kordhinayo hawlaha ka mid noqoshada iyo wax ka qabashada isu-dheellitir la'aanta goobaha kala duwan.<br>4.1 U maalgeli dhammaan dugsiyada si waafaqsan baahiyaha gaarka ah ee ardayda ay u adeegaan, iyadoo la tixgalinayo ardayda Ingiriisiga baranaysa, ardayda naafada ah, ardayda dhaqaale ahaan liidata, ardayda khatarta ugu jirta inay ka baxaan, dhalinyarada iyo kooxaha kale ee taariikh ahaan la takooro.<br>4.2 In la hagaajiyo qaacidooyinka maaliyadeed lana abuuro farsamooyin si loo hubiyo in si siman loo qaybsado kheyraadka ka dhashay lacag ururinta, iskaashiga, iyo deeqaha. |
| 3. **Falanqaynta Xogta**<br>*Xogtee ayaa la falanqeeyey? Miyaa lagula kala saaray jinsiga iyo kooxa kale? Maxay muujisay oo khuseysa kala duwanaanshaha?* | Falanqaynta sinnaanta ee miisaaniyadda DDB waxay ku qaadataa caddadka doollarka dugsi kasta maalgelinta qaarkood, oo waxay xisaabisaa kharashaadka arday kasta ee ardayda hadda ka diiwaangashan dugsiga. Anaga oo adeegsanayna haybta iyo tirakoobka ardayda kale ee muhiimka ah, waxaan markaas ku xisaabineynaa celceliska degmada maalgalintii arday kasta. Falanqayntan waxaa lagu kala saaray SWDs, MLs, dakhliga qoyska, iyo jinsiyadda.<br><br>Iyada oo qeyb ka ah Waxbarashada Loo Dhanyahay REPT ee kor ku lifaaqan, SWD iyo ML xogta falanqaynta ayaa la helay:<br>● Qiimaha ardayda BPS ee ku jira fasallo kala duwan ayaa ka badan laba jeer heerka gobolka iyo kan qaranka.<br>● Intii lagu jiray SY 2021-22, ardayda lab ee madowga ah waxay 3 jeer ka badnaayeen in lagu meeleeyo meel aad uga duwan marka loo eego dhiggooda.<br>● ML-yadu waxay 2.5 jeer uga dhow yihiin in loo aqoonsado naafo dhinaca wada xidhiidhista ah oo lagu meeleeyo meel gaar ah.<br>● 81% ee Horumarinta Luuqadda Ingiriisiga (ELD) Heerka 2 MLs, 56% ee Heerka 3 MLs, iyo 67% ee ML |

| | |
|---|---|
| | oo ay ku jiraan kuwa naafada ah ayaan buuxinin waxyaabaha laga filayo ELA MCAS (Fasalada 3-8).<br><br>Iyada oo qeyb ka ah Maalgelinta Dugsiga Reimagine REPT ee kor ku lifaaqan, falanqaynta xogta ku saabsan diiwaan gelinta, waxqabadka ardayga, qoondaynta miisaaniyada, shaqaalaynta, iyo tashiilaadka la helay:<br>● Qaar ka mid ah tiro-hoosaadyada ardayda ayaa leh natiijooyin aqoomeed oo ka sarreeya kuwa kale, iyadoon loo eegin dugsiga uu dhigto.<br>● Kharashyada heerka dugsigu si joogto ah ulama xidhiidhin natiijooyinka darajada ardayga ama tirakoobka.<br>● Dugsiyada qaarkood waxay leeyihiin natiijooyin ka saraysa dadka la midka ah ee leh kharashyada la midka ah ee arday kasta.<br>● Ma jiro wax xidhiidh ah oo muuqda oo ka dhexeeya cabbirka diiwaangelinta iyo natiijooyinka, ama tirada ardayda dugsiga ee leh aqoonsiyo gaar ah ama baahida waxbarasho iyo natiijooyinka. |
| 4. **Hawlgelinta Daneeyayaasha**<br>*Yaa ka shaqeeyey (tirada, kooxaha muhiimka ah, iyo doorarka) iyo sida, iyo waxa natiijadu noqotay? Maxaa arydeyda/qoysaska inta ugu badan saameeyey codsigan/dadaalkan?* | Qaybta Maaliyaddu waxay ra'yi celin ka raadisay deegaannada muhiimka ah shirarka soo socda:<br>● 11/23 ilaa 12/23 Falcelinta Diyaarinta Miisaaniyada Kormeerayaasha Guud ee Gobolka<br>● 12/7/23 Tababarka Hogaanka Cusub ee Dugsiga<br>● 12/14/23 ilaa 2/7/24 Golaha Goobta Dugsiga/Kulamada Guddoonka Sare ee dugsiyada<br>● 12/14/23 Dhammaan Kulanka Diyaarinta Miisaaniyadda Hogaamiyaha<br>Waxaan sii wadi doonaa raadinta iyo ku darida jawaab celinta labada bilood ee soo socota, oo ay ku jiraan Guddiga Dugsiyada Boston (BSC) ee 2/7/24 iyo Dhageysiga Miisaaniyadda Dadweynaha 2/15, 3/4, iyo 3/20/24.<br><br>Inta badan qoyska iyo shaqada ka qaybgalka bulshada ee waxbarashada loo dhan yahay ilaa maanta waxay ka dhaceen heerka dugsiga sidii dugsiyadu u qorsheeyeen, u qaadan lahaayeen una hirgeliyeen fursado cusub oo loo dhan yahay (ay ku jiraan wakiilada qoyska ee Kooxaha Qorshaynta Ku Darida). Kooxaha kale ee ku hawlan sidii qeyb ka mid ah REPT Waxbarashada Loo Dhan Yahay waxaa ka mid ah Kooxda Shaqada ee Ku Darida, Golaha Latalinta Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah (SpEdPAC), Shaqaalaha Ardayda Luqadda Ingiriisiga (ELL), Golaha Hoggaanka Dugsiga, iyo Golaha Latalinta Ardayda Barta Ingiriisiga ee Degmada (DELAC).<br><br>**Gudida Hagida -** Kooxdan oo ka kooban 12 xubnood oo bulshada BPS ah ayaa ku hawlanaa sidii daneeyayaal muhiim ah Mashruuca Maalgelinta Dugsiga Reimagine, oo ay ku jiraan wakiilada BSAC, SpEdPAC, DELAC, CPC, iyo Shaqaalaha ELL . Kooxdan waxaa awood loo siiyay inay u soo jeediyaan tallada siyaasadda maalgelinta dugsiga cusub ee DDB ee loogu talagalay Kormeeraha guud kaas oo matalaya codka bulshada iyo natiijooyinka la rabo ardayda BPS.<br><br>**Shuruucda Kooxda Shaqada -** Kooxdan oo ka kooban 12 hoggaamiyeyaal dugsi ayaa bixiya aragti iyo khibrad ku aaddan siyaasadda maalgelinta marka laga eego dhinaca dugsiyadooda iyo iyaga oo tallooyinka ka ururinaya kuwa ay isku faca yihiin. Kooxdu waxay matalaysaa noocyo badan oo dugsi oo ay ku jiraan dugsiyada isbeddelka, dugsiyada K-8, dugsiyada hoose, iyo dugsiyada sare, iyo dugsiyada kuwaasoo ay kala duwan yihiin tirada ardayda, goobta juqraafiga, iyo arrimo kale.<br><br>**Gudida Qaabaynta Siyaasadda Maaliyadeed (FPD) -** 18-ka xubnood ee FPD waa daneeyayaasha gudaha ee muhiimka ah oo ay ka go'an tahay inay carqaladeeyaan sinnaan la'aanta taariikhiga ah iyo iyagoo khibrad u leh yoolalka muhiimka u ah dib-u-soo-nooleynta siyaasadda maalgelinta, alaabooyinka, iyo habka cusub. Kooxda waxaa ka mid ah wakiillo ka socda Maaliyadda, Ku darida, Adeegyada Gaarka ah, iyo Kormeerayaasha Gobolka.<br><br>**Kooxda Hawlaha iyo Wada xidhiidhista -** Kooxdan daneeyayaasha gudaha ee muhiimka ah waxay bixiyaan hagitaan hababka ka-qaybgalka ee mashruucan (tusaale, kanaalada isgaadhsiinta, anshaxa, kooxaha ka qeybgalka, fariimaha, iyo wakhtiga). Waxay bixiyaan khibrad ku saabsan isku xidhka xubnaha bulshada DDB iyo qoysaska, kaalmaynta helitaanka adeegyada turjumaada, iyo qaabaynta ka qeybgalka kooxaha taariikh ahaan la takooro. Waxay bixinayaan jawaab celin ku saabsan go'aamada iyo wax-soosaarka dhammaan kooxaha shaqada ee ku xiran Mashruuca Maalgelinta Dugsiga ReImagine.<br><br>Marka lagu daro kooxaha shaqada ee kor ku xusan, hawlahalan soo socda ayaa qabsoomay:<br>● 50 waraysiyo bilow ah oo lala yeeshay daneeyayaasha bulshada BPS, oo ay ku jiraan qoysaska, iyo shaqaalaha xafiiska jooga iyo dugsiga dhexe<br>● Xog ururin in ka badan 250 xubnaha bulshada ah laga sameeyay<br>● Falanqaynta natiijooyinka ka soo baxay Taxanaha Dhageysiga ESSER ee DDB, Kulamada Miiska Wareegsan ee Sinaanta Bulshada, iyo kulamada BSC<br>● Wadahadal kooxeed diiradda lagu saarayo xubnaha waaxda Isbadelka Dugsiyada, Golaha Waalidka Magaalada oo dhan (CPC), Golaha Latalinta Ardayda Boston, SpEdPAC, iyo kooxda ardayda Dugsiga Hernandez K-8. |
| 5. **Xeeladaha Sinaanta Jinsiga**<br>*Sidee ayuu codsigan/dadaalkan u yareeyey kala duwanaanshaha una kordhiyey jinsiga iyo saamiga kale? Waa maxay cawaaqibta aan lagu talo galin ee* | Si loo gaadho sinnaanta jinsiyadda, BPS waxay u baahan tahay inay ka fikirto sida ugu wanaagsan ee loo taageero dugsiyadeena sannadka soo socda, laakiin waxaa ka sii muhiimsan, waxaan u baahanahay inaan qorsheyno seddexda ilaa shanta sano ee soo socota. Waxaan u baahanahay inaan ka weecanno maalgelinta “wax dhib la’aan ah” halkaasoo dugsiyada hoos u dhac ku yimid aysan helin dhimista maalgelinta u dhiganta, taa beddelkeedana aan xidhno fasallada dheeradka ah si aan dib ugu maal-gelinno dugsiyadeenna.<br><br>Soo jeedinta miisaaniyada FY25 waxa ku jira maalgalinta soo socota ee diirada lagu saaray saamaynta tooska ah ee ardayga iyo taageerada ardaydeena baahiyaha ugu badan qaba.<br><br>Waxa kujira Maalgashiyada Waxbarasho: |

BOSTON Public Schools

| | |
|---|---|
| *macquulka ah? Istaraatiijayadehee ayaa kor u qaadaya saamiga?* | ● $15.1M oo Kujiraan Kooxda Qorsheynta (IPT) ee codsiyada shaqaaleysiinta si ay u daboolaan baahiyaha SWDs iyo MLs<br>● $2.7M si loo kordhiyo adeegyada gaarka ah iyo taageerada ML naafada ah ee kujira fasallo gaar ah<br>● $2.2M ee kaydka ah si loo siiyo maalgalin dheeraad ah dugsiyada hadhow si ay uga kaafido hababka balaadhinta<br><br>Maalgashiyada Dheeraadka ah ee Dugsiga:<br>● $6M si loo sii wado in la dhiso asaaska mustaqbalka, oo ay ku jiraan korodhsiimaha:<br>○ Isku-duwayaasha Waxbarashada Gaarka ah<br>○ Cilmi-nafsiyahanada dugsiga iyo lataliyaasha dugsiga<br>○ Tababarayaasha waxbarashada iyo macalimiinta gaarka ah ee Isbadalada Dugsiyada cusub<br>○ Hirgalinta MassCore (shuruudaha qalin jabinta Dugsiga Sare)<br>● $4M Lacag kala beddelka sannadihii hore ESSER Wax dhib ah kuma hayso dugsiyadan ay u muuqato saadaasha diiwaangelinta sii kordhaysa ee FY25 |
| 6. **Miisaaniyada & Hirgelinta** *Waa maxay saameynta miisaaniyadu? Sidee hirgelintu u xaqiijinaysaa in dhammaan ujeedooyinka, gaar ahaan ujeedooyinka la xidhiidha sinnaanta, la gaadhay? Waa maxay kooxaha aqoonsiga kale ee kooxda hirgalita, oo miyey eegi doonaan saamiga?* | Marka laga soo tago maalgashiga kor lagu sheegay, waxaanu filaynaa in Soo jeedinta Miisaaniyadda FY25 ee Magaalada ay ku jiri doonto $81M kordhinta BPS si loogu isticmaalo:<br>● Maalgelinta lagu hago dugsiga ee ardaydeena ugu baahida badan ($30M wadarta, $20M oo ay Kujirto Waxbarashadu)<br>● Qorshaynta wixii ka dambeeya ESSER ($6M) - Qoraal akhris loo siman yahay, Taageerada Ardayga, Qorshaynta raasamaalka, iwm.<br>● Dhisida Asaaskeenna: Universal Pre-K ($11M), Heshiiska Gorgortanka Wadareed ee BTU ee ESSER ($17M)<br>● Kharashaadka Kordhay: Xarumaha ($11M), Gaadiid ($12M), Kharashyada Wakhtiga Waxbarasho ee La Kordhiyey ($8M), Adeegyada Cunnada ($4M), Wax kale ($9M)<br><br>Keydinta Kharashka:<br>● Waxtarka Miisaaniyada Xafiiska Dhexe (-$17M)<br>● Isku dhafka fasalka iyo dib u habeynta (- $10M)<br><br>Kooxda hirgalinta miisaaniyada waxaa kamid ah dhamaan hogaamiyayaasha dugsiyada iyo degmooyinka, iyagoo la kaashanaya Xafiiska Maaliyadda, oo guud ahaan wakiil ka ah tirakoobka ardayda iyo qoyska. Xubnaha kooxda oo ay ku jiraan kormeerayaasha gobolka, iyo xubno ka socda Xafiisyada Maaliyadda, Raasamaalka Aadanaha, Adeegyada Gaarka ah, Waxbarashada Luqaddaha iyo Hawlaha Kala Duwan, iyo Isbeddelka Dugsiga iyo Degmada. |
| 7. **Islaxisaabtanka & Isgaarsiinta** *Sidee ayaa sameeynta loo qiimeyn doonaa, qori doonaa looguna gudbin doonaa daneeyayaasha? Yaa ka masuul noqon doona?* | Saamaynta hindisayaasha kala duwan ee miisaaniyada waxa la socon doona waaxyadooda kala gaar ah. Tusaale ahaan, Xafiiska Adeegyada Gaarka ah ayaa bixin doona cusboonaysiinta qorshaha la isku dayo inta lagu jiro SY25.<br><br>Waaxda Maaliyaddu waxay ku soo celin doontaa BSC si ay ula wadaagto wararka ku saabsan horumarka laga gaadhay hindisayaasha ay maalgaliyeen maalgelinta degmadu bisha Diseembar 2024. Waxa jiri doona 3 dhegaysi miisaaniyaddeed ah oo la qaban doono bilaha Feebarwari iyo Maarij intaa waxa dheer kulamada warbixinta ee u muddaysan BSC si loo helo faalada dadweynaha iyo falcelinta.<br><br>Bulsho kasta oo dugsi waxay sii wadi doontaa inay la shaqeyso Golaha Rugta Dugsiga iyo IPT si ay u hirgeliyaan maalgelinta SY25. |